

Barashada K ilaa 12 inta lagu gudajiro KOOFID-19

Hagidda iyo qorshooyinka ardayda inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2020 - 21.

Dulmar

Xayiraadda qasabka ah - Gobolka oo dhan - Laga bilaabo Nofeembar 30

Fasalada 7-12 ardayda

- Uguuraan dhanka waxbarashada guriga Nofeembar 30 illaa iyo Janaayo 8, marka laga reebo xilliga nasashada jiilaalka *
- Dib u bilowga fasallada shaqsi ahaan Janaayo 11
- Imtixaannada dibloomada waa ikhtiyaari inta sannad dugsiyeedka ka harsan. Ardayda iyo qoysaskoodu waxay dooran karaan inay qoraan imtixaan ama helaan ka dhaafitaan imtixaannada Janaayo, Abriil, Juun iyo Agoosto 2021.

Ardayda Fasalada K-6

- Tan waxaa ku jira Adeegyada Carruurnimada Hore ([Early Childhood Services](#))
- Sii wad waxbarashada tooska ah ee qofka illaa jadwalkooda jiilaalka la qorsheeyay (guud ahaan Dec. 18 *)
- Uguuridda waxbarashada guriga kadib fasaxa qaboobaha ilaa Janaayo 8
- Dib u bilowga fasallada shaqsi ahaan Janaayo 11

*Iskuulada waxay leeyihiin jadwal kala duwan oo fasax jiilaal ah, kala xiriir iskuu;kaagaaga wixii faahfaahin ah.

Taageerida ardayda naafada ah iyo barnaamijyada fidinta

Dhammaan ardayda naafada ah ee u baahan taageerada iyo adeegyada fasal kasta oo baahidooda aan lagu dabooli karin waxbarashada guriga iyo ardayda ku jira barnaamijyada gaarsiinta ([outreach programs](#)) waxay sii wadi karaan inay helaan kaalmooyin iyo adeegyo gaar ah ee dugsiga, iyadoon loo eegin isbeddelada ku yimaada barashada guriga ka hor iyo fasaxa jiilaalka kadib.

- Ka dhaafitaankan shaqsi ahaaneed ee waxbarashada wuxuu ku salaysnaa talo bixinta Madaxa Caafimaadka Sarkaalka Caafimaadka.
- La tashiga waalidiinta kadib, iskuulada waxaa laga filayaa inay sii wadaan inay ardayda naafada ah siiyaan adeegyada iyo taageerada ay u baahan yihiin.
- Waalidiintu waa inay la shaqeeyaan macallinkooda iyo maamulaha dugsiga sida ku habboon.

Qabanqaabada shaqada ee shaqaalaha iskuulka

Maamulka iskuulka deegaanka, shaqabixiye ahaan, ayaa mas'uul ka ah go'aamada la xiriira shaqaalaha dugsiga ee sii wadaya ka shaqeynta iskuulka ama ka shaqeynaya guriga.

Mas'uuliyiinta iskuulka go'aanadooda iyo habka ay u wajahayaan waa inay sii wadaan inay raacaan Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada iyo sidoo kale talaabooyinka caafimaadka gobolka.